

Dhismaha 2027

Dayactirka Boosteejada Franklin Avenue

metrotransit.org/franklin

Gacan ka geyso Qaabeynta Mustaqbalka Boosteejada Franklin Avenue

Leenka Buluuga Metro ee Boosteejada Franklin Avenue, ee la furay 2004, waxaa ku socda dayactir weyn si wax looga qabto kaabaha duugoobay, cilada sida joogtada ah ugu imaada wiishka, waxyaabaha ka dhamaaday, iyo walaacyada ka dhanka ah badqabka ee ay qabto bulshada. Qayb ka mid ah dadaalkan, waxaan la shaqeyneynaa bulshada si aan u hubinno in naqshada boosteejada ay ka tarjumayso xaafadda iyo dadka ay u adeegto.

Naqshadeynta waxay bilaabatay Dayrtii 2025. Dhismaha waxaa loo qorsheeyay inuu bilaabmo Febraayo 2027, wuxuuna socon doona ilaa iyo Diseembar 2027.

Nagu soo biir Kulanka Dadka Dhan u furan

War-celinti aad ku bixisay Wajigii 1aad waxaa loo isticmaalay in lagu wargeliyo naqshad la soo jeediyay in laga dhiso boosteejada Nagu soo kulan dadka dhan u furan onlayn ah ama qof ahaan ah si aad u aragto naqshada la soo jeediyay in laga dhiso boosteejada iyo si aad noola wadaagto war-celino dheeraad ah oo ku saabsan sida uu u egyahay iyo sida laga dareemi karo boosteejada.

Kulan Onlayn ah oo Dadka Dhan u Furan:

Talaado, Maarso 17keeda

6 p.m. - 8 p.m.

Waxaad ugu soo biiri kartaa adigoo iskaan marinaya QR koodhka ama booqanaya: <https://tinyurl.com/franklinstation-openhouse>



Kulanka Qof ahaan loo imaanayo goobta ee Dadka Dhan u furan:

Arbaco, Maarso 18keeda

5:30 p.m - 7:30 p.m.

Minneapolis American Indian Center
(1530 E Franklin Ave)

Macluumaadka lagu wadaago kulamada u furan dadka oo dhan ee onlaynka ah iyo kuwa qof ahaan goobta loo imaado waxaa la soo dhigi doonaa websaydka mashruuca marka dhacdooyinka la qabto kadib.

Xog ogaal ahood Ma xiisaynaysaa mashruuca? Waxaan jeclaan lahayn inaan dhagaysano fikradahaaga.



Franklin@metrotransit.org



metrotransit.org/franklin



[MetroTransitMN](https://www.facebook.com/MetroTransitMN)



612-373-3333

Call for translation

Llamar para la traducción

Gọi điện để nhận bản dịch

Wac Turjimid

Hu rau tus txhais lus

